

Event remarks about measles

You can use these remarks at a community event to share information about measles, vaccination, and staying healthy. Feel free to use only the parts you need or adapt these remarks to share your message with your community.

Jadeecadu waa cudur halis ah oo hadda ku faafaya gudaha bulshadeena. Waxaa keena fayras aad u faafa oo si fudud ugu gudba marka dadku qufacaan, hindhisaan, neefsadaan ama xitaa hadlaan.

Dadka qaar waxay wajahaan khatar aad u weyn oo ka timaada jadeecada. Waxaa ka mid ah dhallaanka iyo carruurta yaryar ee aan weli si buuxda loo tallaalin, dadka uurka leh iyo dadka leh difaac jidheed oo daciif ah. Dadkaas jadeecadu waxay u noqon kartaa mid aad u halis ah, waxayna keeni kartaa dhibaatooyin culus oo ay ku jirto in isbitaal lagu dhigo.

Warka wanaagsan ayaa ah inaan ognahay sida aan isu ilaalin karno nafteena iyo dadka kale.

Difaaca ugu xooggan ee ka dhanka ah jadeecada waa tallaalka. Dhakhaatiirta iyo khabarada caafimaadka waxay ku kalsoon yihiin tallaalka jadeecada sababtoo ah waa ammaan waana la xaqiijiyay inuu shaqeeyo. Tallaalku wuxuu xoojiyaa difaaca jirka isagoo baraya jirka sida uu ula dagaallamo fayraska ka hor inta uusan xanuun daran nagu ridin. Tallaalka jadeecada waxaa lagu bixiyaa laba irbadood, waxaana laga heli karaa xafiisyada dhakhaatiirta, rugaha caafimaadka iyo farmashiyaal badan.

Waxaan sidoo kale waxaan gacan ka geysan kartaa yareynta faafitaanka annagoo guriga joogayna oo ka fogaanayna dadka kale marka aan xanuunsanahay. Haddii aad leedahay qandho, qufac ama sanko oo duuf ka socdo, ka fogaanshaha dadka kale waxay gacan ka geysataa yareynta faafitaanka jadeecada.

Finanku badanaa waxay soo baxaan goor dambe, taasoo ka dhigaysa inay adkaato in marka hore la garto. Haddii adiga ama ilmahaagu yeesho finan, wac dhakhtarkaaga ama rugta caafimaadka ka hor inta aadan tagin. Waxay kaa caawin doonaan diyaarinta qorshe daryeel iyadoo la yareynaayo suurtagalnimada in dadka kale la halis geliyo.

Ilaalinta bulshadeena jadeecada waa wax aan wada sameyn karno: Qaado tallaalka, ogoow calaamadaha oo guriga joog marka aad xanuunsan tahay. Markaan qaadno tallaabooyinkan, waxaan ilaalin karnaa dadka aan jecelnahay oo aan ka caawin karnaa bulshadeena inay ahaato mid caafimaad leh oo ammaan ah.